

12-ka Febraayo, 2021

Qoysaska Qaaliga ah ee Dugsiga Sare Ee Highland Park:

Waad ku mahadsantihii taageeradiinna inta aynu sannad-dugsiyeedka sii wadno isagoo ah waxbarashada durugsan. Waxaan ku faraxsannahay inaan billaabayno caawinta waxbarasho oo qof ahaan loo imanayo iskoolkeenna toddobbaadka February 22 oo loogu talo galay arday gaar ah oo u baahan kaalmo waxbarasho oo dheeraad ah. Ilmahaaga xaq buu u laayahay waana lagu dhiirri gelin inay yimaadaan. Barnaamijkaani waa mid kaalmo dheeraad ah ku ah casharrada subixii ay qaataan oo ay tahay inay sii wadaan.

Halkan waxaa ku yaal faahfaahin muhiim ah oo ku saabsan waxa la filan karo goorta caawinta qof ahaaneed (tooska ah) ay billaabato:

### **Jadwalka Iskoolka**

Ardayda waxay imaan doonaan iskoolka maalinta loo qorsheeyay oo wakhtigu yahay 12:30 ilaa 3:00 PM oo loo kala qaybiyay xarafka uu magacooda dambe ka billoowdo. Aad bay muhiim u tahay inay ardaydu yimaadaan maalinta loogu talagalay sida hoos ku qoran, waxaana laga rabaa inay xilliga idil joogaan.

Magacyada Dambe ee Ka Kaca: Xarfaha A ilaa L, Fasallada 9-aa ilaa 12-aad, waxay imanayaan **Isinninta iy Taladaada** keliya.

Magacyada Dambe ee Ka Kaca: Xarfaha M ilaa Z, Fasallada 9-aad ilaa 12-aad, waxay imanayaan **Arbacada iyo Khamiista** keliya.

Ardaydu waxay heleyaan kaalmo waxbarasho oo dheeraad ah (tutoring) iyo taageero la talin haday u baahdaan. Macallimiinta hadda u dhigta mar kasta heleyaan laakiin macallimiin kale oo isla maaddada dhigta ayaa u joota. Ardaydu waa inay la yimaadaan iPad korantadiisu buuxdo, buugaagta maaddada iyo kuwa wax lagu qoro; sidoo kale makiinadda xisaabta, iyo qalabka wax lagu qoro sida qalimada. Ardayda fasal u gaar ah ayaa lagu qorayaa oo ay Campus-ka ka fiirsan karaan. Fasalkiiba toban arday ayaa lagu qorayaa. Waxaana la raacaya habka kala fogaanshaha caafimaadka bulshada.

### **Imaanshaha Iskoolka**

Caawinta qof ahaaneed qasab ma ahan, mana saameynayso is-xaadirinta ardayga. Dhammaan ardaydu waxay ku sii jiri doonaan waxbarashada durugsan oo ah qaabka rasmiga ah ee ay wax u baran doonaan. Wakhtiga ay shakhsi ahaanta u joogaan iskoolka waxaa loo isticmaali doonaa in laga caawiyo casharrada internetka ay ka qaataan, ee lama barayo waxyaabo cusub. Si kastaba ha ahaatee, haddii arday loo qoondeeyey caawinta qof ahaaneed misana uusan imaan, qoyska ayaa la ogeysiin doonaa.

### **Gaadiidka Iskoolka**

Ardayda dhigata iskoollada 9-12 waa lala soo xiriiri doonaa haddii loo qorsheeyo inay helaan caawinta qof ahaaneed iyagoo loo sheegayo goobta iyo goorta ay ka raacayaan baska.

Ardayda qaarkood waxaa dhici karta inay meel ka durugsan u lugeeyaan oo ka duwan goobtii ay caadi ahaan baska ka raaci jireen.

### **Qaabka Qoysasku U imaanayaan Iskoolka**

Ardayda waa in lagu dejiyo bannaanka hore ee laga soo galo iskoolka. Qoysku uma kaxeyn karo ardayda fasalladooda ama meelkasta oo ka mid ah gudaha iskoolka. Intaas waxaa sii dheer, qoysaska looma oggolaan doono inay ka qadeeyaan iskoolka, ama kormeeraan fasal, ama si mutadawacnimo ah uga shaqeeyaan fasalka, ama inay ku lug yeeshaan waxqabadyo kale oo ka socdo gudaha iskoollada.

### **Talooyinka COVID-19 ee Ardayda iyo Qoysaska**

Qoysaska dib ugu soo noqonayo iskoolka waa inay iska bartaan tilmaamahan, oo si joogto ah ayaa loo cusbooneysiisaa tilmaamahaan iyagoo isla markaana ka hadlo xeeladaha ka hortagga xanuunka, baaritaanka iyo ka warqabka caafimaadka, qaabka la isku karantiilo, iyo [Nidaamka SPPS loogu soo Gudbiyo Warbixinta COVID-19](#).

### **Baaritaanka Caafimaadka**

Qoysasku waa inay sameeyaan baaritaan caafimaad subax kasta ka hor intaan ardaydooda loo dirin iskoolka ama goobta baska laga raaco. Shaqaalaha iskoolka ayaa sidoo kale la socon doono astaamaha faayruska inta ay ardaydu joogto iskoolka maalintaas oo dhan. **Haddii ilmahaagu muujiyo wax calaamado ah COVID-19, ha u dirin iskoolka.** Wixii maqnaansho ah u soo sheeg iskoolka ilmahaaga, oo isla maalintaasba warbixin u soo gudbi bogga [Nidaamka Warbixinta ee COVID-19](#) si aad u ogaatid tallaabooyinka xiga ee aad qaadeysid.

### **Af-Xirrada iyo Weji-daboollada**

Ardayda fasallada K-12, shaqaalaha iyo booqdayaasha waxaa looga baahan yahay inay xirtaan gafuur-xir haddii aan looga reebin xaalad caafimaad ahaan. Qof walba waa inuu keensadaa weji-daboole isaga gooni u ah marwalba oo ay suuragal tahay. Si kastaba ha noqotee, gafuur-xirrada ayaa loo heli doonaa qof kasta oo u baahan oo iskoolka joogo ama baska saaran.

### **Ardayda Bukaanka ah**

Ardayda xanuunsado iyagoo maalintii joogo iskoolka waxaa laga soocayaa ardayda kale (isagoo la ilaalinayo) ilaa ay waalidkood u yimaadaan. Waxaa muhiim ah inay waalidku qaadaan ardayda jiran sida ugu dhakhsaha badan ee suurto-galka ah si loo yareeyo halista ardayda kale iyo shaqaalaha. **Fadlan hubi in macluumaadkaaga xiriirka ee ku jira bogga [Campus](#)** uu yahay kii u dambeeyay ee saxda ahaa.

### **Adeegga Cunto Bixinta**

Cunto bilaash ah ayaa la siin doonaa dhammaan ardayda inta lagu jiro caawinta qof ahaaneed. Intaas waxaa sii dheer, cuntada baakadeysan ayaa laga soo qaadan karaa dhowr iskoollo oo ku dhex yaal Saint Paul. Cunto keenidda ayaa loo heli karaa ardayda

caafimaad ahaanta u nugul/jilicsan ama aan ka bixi karin gurigooda si ay u soo qaataan cunto.

Mahadsanidiin,

Dr. Winston H. Tucker  
Maamulaha